Uppsala Universitets Bibliotek.
Teologi.
Biblar.
Afrikanska
Somali språk.
K. UNIVERSITETS-BIBLIOTEKET
26. VIII. 1915.
UPPSALA

# ANJILKA SIDU ḌIGEY

# MARKO

LONDON
BRITISH AND FOREIGN BIBLE SOCIETY
1915

ST. MARK'S GOSPEL IN SOMALI

TENTATIVE EDITION

ANJILKA SIDU DIGEY

# MARKO

## SURADA 1

1 Bilawgi anjilki Yesu Kristo, Wilki Ila-
hey.
2 Sidi lugudigey kutubahi nabiyalka: Firi,
aniga wahan diraya malaig teyda fol
kaga hortisa, okusubin donto jid kaga hor-
tadha;
3 Od kisa okaghaylinaya gelgesha: Su-
biya jidki Rabi, tosiya mura hisa. 4 Wuso-
bahey Yohana, wahu kubatisayey gelgesha,
oskuwadiyey batiski tobada, hahelane afiski
dembiga. 5 Wahay ukaen asaga dadki dalki
yahud kuli iyo kuwi Yerusalem odan, waha
lugubatisey kuli wobi Yordan, oyghirten
dembi godha. 6 Yohana wahu guntana
maryahi dogor gel, sun meged ah yu mohog
gisa kughabey, wahu unayey ayah iyo malab
dured. 7 Wu wadiyey, wahu yiri: Waha
imanaya gadasheyda nin oiga hog badan;
stahil kumaihi inan forarsado onfuro yelmahi
kaba hisa. 8 Aniga wahan idinkubatiseya
biya, asaga wahu idinkubatisaya Nafta Ghu-
dus ah.
9 Wahay eheyd berya has, Yesu wahu
kaimadey Nasaret ki Galilaya, Yohana bana-
kubatisey Yordan. 10 Markiba, kolku ka-

behey biyaha, wahu arkey irka okaladilaey, o
Nafta sidi gholey kusodegtey korkisa. 11 Od
bakasobehey irka: Wahad tahay Wil keyga
anjela wan kujeladey.
12 Markiba Nafta wahay geysey tan iyo
gelgesha. 13 Wahu jogey gelgesha dahde-
dha afartan beri, waha sherabey sheydan,
wahu lajogey bahalada, malaigyalka bauade-
gayen.
14 Yohana kolki lahabisey, Yesu wahu
imadey Galilaya, oskuwadiyey anjilki sulda-
nimadi Ilahey, wahu laha: 15 Wahay tahay
aminki, osuldanimadi Ilahey osodowatey.
Tobad kena, amina anjilka.
16 Gortu marayey hebti badi Galilaya,
wahu arkey Simon iyo Andrea, walal kisa,
wahay kuturayen shabagta bada, sababti wa-
hay ahayen jilabato. 17 Yesu wahu kuyiri:
Kaleya, iraa, anigana wahan idinkadigaya
dad jilaboyin. 18 Markiba way iskadafen
shabagya dodha oyraen. 19 Kolku horey
usodey kisto, wahu arkey Yaghub, wilki
Sebedayo, iyo Yohana walal kisa, ayakana
donida bey kujiren, 20 wahay kabayen
shabag todha. Markiba wahu uyerey ayaka,
wahay kudafen aba hodha Sebedayo doni-
da dahdedha iyo kuwi ijarada, wayraen
asaga.
21 Wahay galen Kapernaum, markiba
berigi sabato wahu galey sunagug, osbarey.
22 Way kuyaben barid disa, sababti wahu
kubarayey sidi mid amar leh manaaha sidi
kuwi fartayaghan. 23 Waha kujirey suna-
gug godha nin jini ghaba, wa dawaghey,





wahu yiri: 24 Mahan kaghabna adigana
Yesu ki Nasaret? Mawahad uimatey inad
nahaleyso? Wan kuaghan kad tahay ghu-
duski Ilahey. 25 Yesu wu anantey, wahu
dehey: Amus, kabah asaga. 26 Jinigina
wa udifdiftey, wahu kughayliyey od weyn,
oskabehey. 27 Kuligodh way yaben tan
iyo way iswarsaden, wahay dehen: Mahay
tahay wah han? Wa ilmi usuban sidee wah
han? Sababti amar hog leh bu kuamra
jiniyada, ayakana way maghlan. 28 Marki-
ba war kisa wahu usobahey dalki kuli, oku-
waregsana Galilaya.
29 Markiba wahay kasobahen sunaguga,
oygalen aghalki Simon iyo Andrea, ayaka
iyo Yaghub iyo Yohana. 30 Sodohdi Simon
ghandey ujiftey, markiba wahay ushegen
war kedha. 31 Wu uyimid, wahu ghabtey
gaan tedha, wa ukiiyey, ghandadi way sidey-
sey, way uadegtey.
32 Kolkey eheyd makhrib oghorahda da-
dey, wahay ukenen kuwi jiranayen odan iyo
kuwi jiniya ghaben. 33 Dadki beledka odan
wahay kusoaruren irida hor tedha. 34 Wa-
hu bogsiyey dad badan obestod uahayen
udur eyn walba, wahu eriyey jiniya badan,
omanaasan udeynin jiniyada iney hadlan,
sababti way ogayen.
35 Saladi tan iyo intusan wagaberin, intu
kaey bubahey, wahu ukaey melan dad lehen,
wa ukusotukadey hagas. 36 Waha raen
Simon iyo kuwi lajiren, 37 kolkey arken,
way ushegen: Kuli way kudonayan. 38 Asa-
gana wahu yiri: Antagno mel kale buloyinka

dowdow ankuwadiye hagasna, sababtas da-
radedhan usobahay. 39 Wahu kuwadina-
yey sunagugyal kodha Galilaya odan dahde-
dha, okabihiyey jiniyada.
40 Waha uimadey ku jedan ghaba wa tu-
gey, osujilbadaey, wahu kuyiri: Hadad rabto,
wad idahirin karta. 41 Sa Yesu wa una-
haristey, gaanta yufidiyey, wa utabtey,
wahu kuyiri: Wan raba, dahiran. 42 Kolku
sidas yiri, markiba jedanka wa kabahey, wa
dahirmey. 43 Hog bu uamrey, wu iska-
direy hagisa, wahu kuyiri: Firi ha ushegin
ghofna war kan, ilowse ka istus wadadka,
44 sadagha ubihi dahirnan tadha, sidu Muse
amrey, marag ha unoghote ayaka. 45 Asa-
gana wa ubahey, wahu bilabey ad inu uwa-
diyo oswarejiyo warka, tan iyo Yesu maasan
gali karin beled, ilowse wahu jogey dibeda
mel idla ah, wahay ugaimaden mel walba.

## SURADA 2

1 Dowr beri kabadi wahu galey hadana
Kapernaum, wa lamaghley inu kujirey
aghalka. 2 Markiba dad badan ba arurey
tan iyo wasaa irida hortedha mana deghin,
wahu uwadiyey hadalka. 3 Wahay uima-
den asaga, oyukenen nin uryan ah, waha
waden afar ghof. 4 Ayakana gortey ku-
sodowan wayen makhlugha daradisa, sarta
guba dedha bey duleliyen meshu jogey,
kolkey duleliyen, wahay kasodejiyen sarirtu
kujifey ki uryanka aha. 5 Yesu gortu
arkey iman kodha, wahu kuyiri ki uryanka





aha: Wil keyga dembi gaga wa luguafiyey.
6 Waha fadiyen hagas kuwi fartayaghan
ghar kodha, wahay kafikirayen ghalbi godha:
7 Mahu kan sidas ugukufrinaya? Ya de-
mbi afin kara Ilahey keliya mahee? 8 Mar-
kiba Yesu wahu kagartey ghalbi gisa, iney
sidas kafikirayan ghalbi godha, wahu yiri:
Mahad agafikireysan wah han ghalbi gina?
9 Tee ba fudud in luguyirahdo kan uryanka
ah: Dembi gadha wa luguafiyey, mase in
layirahdo: Jogso sarir tadha saro, soo?
10 Ilowse adkastane Wilki Aden inu amar
kuleyahay duniyeda oskuafiyo dembiga,
11 wahu kuyiri ki uryanka aha: Wahan
kuleyahay: jogso sarir tadha saro, guri
gadha uka. 12 Wa ujogsadey markiba,
wahu sartey sarir tisa, oskatagey hortodha
odan, tan iyo way iskunehen kuligodh
oyamanen Ilahey, wahay dehen: Maeynan
arkin wah han weligayna.
13 Hadana wahu ukaey bada barbar
kedha, makhlugha odan asagey uimaden,
wu barey. 14 Gortu marayey, wahu arkey
Lawi, wilki Alfayo, ofadiyey furdada, wahu
kuyiri: Ira. Wa ujogsadey, wa uraey.
15 Wahay eheyd gortu untada ufadiyey
aghalki Lawi dahdisa, dulala badan iyo
kuwa dembi leh yalafadiyen Yesu iyo
asahab tisa, sababti wahay ahayen kuwa
badan oraen. 16 Kuwi fartayaghan iyo
farisayalka kolkey arken asaga inu launayo
dulalada iyo kuwi dembi leh, wahay kude-
hen asahab tisa: Mahu ulaunaya osulaabaya
dulalada iyo kuwi dembi leh? 17 Yesu

gortu maghley, wahu kuyiri: Kuwi fayow
ma raban sanolow, ilowse kuwa jiran; ma
uimanin inan uyero kuwa hagh leh, ilowse
kuwa dembi leh, ha tobad kenane.
18 Asahabti Yohana iyo kuwi farisa-
yalka way soman; way imaden, wahay
kudehen: Mahay usoman asahabti Yohana
iyo asahabti farisayalka, ilowse asahab
tadha ma soman? 19 Yesuna wahu ku-
yiri: Sidey usomi karan dadki aroska intu
lajogo ninki aroska? Wakhti walba intu
lajogo ninki aroska, ayaka ma somi karan.
20 Ilowse berya iman donan, olagaghadi
dono ninki aroska, berya has yey somi
donan. 21 Ma jiro ghof kutolaya karin
usuban mara dug ah, hadi lugutolo, tan
usuban wa sijehjeheysa tan duga ah, jeh-
ninta waysikordeysa. 22 Majiro ghof ku-
shubaya daanki sabib usuban gharbetyal
dug ah, hadu kushubo, daanki sabibta
usuban wa jehjehaya gharbetyalka, daan-
kana wa ghubanaya, gharbetyalkana wa
halabayan; ilowse daanki sabibta usuban
waha lugushuba gharbetyal usuban.
23 Wahay eheyd berigi sabato, kolku
marayey beraha dahdodha, asahab tisa
wahay bilaben, kolkey sooden, iney jebje-
biyan sabulada. 24 Farisayalkana wahay
kudehen: Firi, mahay usubinayan wah an
halal eheyn berigi sabato? 25 Asagana
wahu kuyiri: Sow maeydnan akhrinin marko-
na sidu subiyey Daud, kolku muhtaj uaha,
wa bahdey asaga iyo kuwi lajiren? 26 Sidu
ugaley aghalki Ilahey wakhtigi wadadki





weyna Abiatar, wahu uney kibisti tusida
anhalal ueheyn kuwa kale wadadaha mahee,
wahuna siyey kuwi lajiren. 27 Wahu ku-
dehey: Sabato wahey unoghotey ghof dara
disa, sabato daradedha umanoghonin ghof.
28 Sidas Wilki Aden tala bukuleyahay saba-
todana.

## SURADA 3

1 Wahu galey hadana sunaguga, waha
jogey hagas ninko gaanta nafa ka ah.
2 Way ilalinayen hadu bogsinayo nin kas
berigi sabato ha ashtakeyane. 3 Wahu
kuyiri ninki gaanta nafada ka aha: Jogso
dahda. 4 Asagana wahu kuyiri: Ma ha-
lalba beriga sabato in lasubiyo wah fian
mase in lasubiyo wah hun, in lafakiyo naf
mase in ladilo? 5 Way amusen. Wahu
kufiriyey dirif barbar walba, alolhuma
gashey sababti ghalbi adkan todha, wahu
kudehey ninki: Fidi gaan tadha. Wu fidi-
yey, gaan tisa way bogsatey sidi tan
labad. 6 Markiba way behen farisayalka
oykulashauren dadki Herode sidey udu-
miyan.
7 Yesu wa latagey asahab tisa tan iyo
bada, makhlugh badan ba kasoraey Gali-
laya iyo Yudea 8 iyo Jerusalem iyo Idu-
maya iyo Yordan gedigisa iyo barbarki
Turo iyo Sidon, makhlugh badan, kolkey
maghlan waha weyn ossubiyey, way uima-
den. 9 Wahu kudehey asahab tisa, do-
nida yar hakusugto mel dow makhlugha
daradisa, yeyan aririnine, 10 sababti wa-

ẖu bogsiyey dad badan; waẖay ukufen asaga
kuwi rafadayen ođan ha helane iney tabtan
asaga. 11 Jiniyalkana gortey arken asaga,
hortisa bey kukufen, way ghayliyen, waẖay
kuhadlen: Adiga Wilki Ilahey batahay.
12 Ad bu uamrey yeyan dahirinine.
13 Waẖu fuley burta, waẖu uyertey intu
rabey, way uimaden. 14 Waẖu kađigey
laba iyo toban ha lajogane asaga. 15 Asa-
gana ha udire iney wa̱diyan ha helane amar
aykubogsiyan u̱durya, aykubiẖiyan jini-
yada. 16 Simon osubiẖiyey Petro, 17 iyo
Yaghub wilki Sebedayo iyo Yohana walalki
Yaghub wilki Sebedayo osubiẖiyey Boa-
nergi, ma̱na hedha wa wilashi gugaa̱,
18 iyo Andrea iyo Filipo iyo Bartolomayo
iyo Mattayo iyo Thoma iyo Yaghub wilki
Alfayo iyo Tadayo iyo Simon, rer Kanan,
19 iyo Yuda Iskariote, asagi biẖiyey.
Kabaḏi waẖay galen aghalka.
20 Makhlugh ba isusoarurey hadana, tan
iyo maayan karin iney u̱nan hunguri.
21 Kolkey khabarka helen gharaba disa,
waẖay ukae̱n iney soghabtan, sababti wa-
ẖay đehen: Wa aghli beley. 22 Kuwi farta-
yaghan okasodegen Yerusalem, waẖay đe-
hen : Waẖu ghaba Beelsebul oẖogi ki
uweyna jiniyada yu kubiẖiya jiniyada.
23 Wau uyerey, waẖu ugushegey mahmah:
Sidebu sheydan ubiẖin kara sheydan ?
24 Iyo suldanima hadey isfidmeyso, sulda-
nima das ma jogi karto. 25 Iyo guri hadu
isfidmeyo, guri gas ma đisnan karo. 26 Iyo
sheydan hadu iskukao̱ wa fidmobey, ma jogi





karo, ilowse đamasha buleyahay. 27 Ma-
jiro nin geli kara nin ẖog leh aghal kisa inu
kađao̱ alab tisa, hadusan ẖirin horta ninka
ẖog leh, kolkasu kađaa̱ya aghal kisa.
28 Amin waẖan idinleyahay: Đembi godha
wa lagaa̱fin đadka, iyo a̱y dodha, waẖay ku-
hadlan ođan; 29 ilowse ninki a̱yo Nafta
Ghudus ah, la ma a̱finayo tan iyo weligis,
ilowse waẖa luguleyahay ẖukunki weligis,
sababti waẖay đehen: 30 Waẖu ghaba jini.
31 Waẖa imaden habar tis iyo walala
hisa, waẖay istagen bananka, waẖay udiren
ghof uyera. 32 Makhlughi barbar walba
kafađiyen, waẖay kuđehen: Firi habarta
iyo walalaha bananka bey jogan way kudo-
nayan. 33 Wau ujawabey, waẖu kuyiri:
Ya habartey ah ama walalahey ah ?
34 Waẖu firiyey kuwi barbar walba kafa-
điyen, waẖu đehey: Firi habartey iyo
walalahey ! 35 Sababti ghof walba osu-
biya amarki Ilahey, asaga walalkey ah owa-
lashey ah ohabartey ah.

## SURADA 4

1 Waẖu bilabey hadana inu kubaro bada
agtedha. Waẖa usoaruren makhlugh ba-
dan, tan iyo asaga waẖu fuley doni, waẖu
faristey bada; makhlughi ođan waẖay jogen
bada agtedha đulka korkisa. 2 Waẖu ku-
barey waẖ badan mahmah, waẖu kuyiri
barid disa daẖdedha : 3 Maghla ! Nin
ber abura waẖu ukae̱y inu soaburo. 4 Gortu
aburayey, ghar waẖay kuđae̱n jidka, shi-

mbira imaden ounen. 5 Gharna wahay
kudaen mel dagah leh, oanleheyn doba
badan, markiba way sobahen: sababti do-
bada kuyared. 6 Kolkey ghorahda soba-
hdey way gubten, sababti hidida laan bey
uengegen. 7 Gharna wahay kudaen gho-
dahda dahdedha, ghodahdina way weynatey
oyaririsey, yeyan dalin mira. 8 Gharna
wahay kudaen doba wanagsan, wahay
dalen mira, way behen oykorden, way
dalen, ghar Sodon gharna lehdan gharna
boghol. 9 Wahu kuhadley : Ninki dega
lugumaghlo leh, ha maghlo.

10 Kolku aha keligis, kuwi lajogen iyo
laba iyo tobanki wahay warsaden manahi
mahmah dan. 11 Wahu kuyiri: Idinka
laidinsiyey inad garatan gharsodigi sulda-
nimadi Ilahey, ilowse kuwa bananka ah
kuli wahay uguimanayan mahmah, 12 ha-
dey firiyan, ha arkene yeyan garanin;
hadey maghlayan, ha maghlane yeyan gara-
nina, yeyan tobad kenin, ha laafiye dembi
godha. 13 Wahu kuyiri: Sow makaseysan
mahmahda tan ? Mahmahdo dan sidee bad
ugaraneysan ? 14 Ber aburka wahu abura ha-
dal. 15 Wana kuwan kuwa jidka yalin ohada-
lka luguaburo, kolkey maghlan, markiba waha
imanaya sheydan, okaghada hadalki lugu-
aburey ghalbi godha. 16 Wa lamid kuwi
luguaburey mel dagah leh, kolkey maghlan
hadalka, marko wahay kuaghbalan furahad,
17 kumana eylaha hidida ghalbi godha,
ilowse wahay fadiyan abar, kabadi, kolkey
noghoto dib ama eris hadalka dara disa,





marko way nebadan. 18 Wana kuwan
kuwa luguaburey ghodahda, omaghlayan
hadalka, 19 iyo shughulki duniyeda iyo
sirti malka iyo damai wah kale wa galan
oyejiyan hadalki, mira ma bihiyan. 20 Wa-
na kuwan kuwa luguaburey dobada fian;
omaghlan hadalka oaghbalan, obihiyan
mira, mid sodon, midna lehdan iyo midna
boghol.

21 Wahu kudehey: Ma waha lokeney
musbahda in lageliyo dambisha hostedha
ama sarirta hostedha ? Sow lamasaro
miska korkisa ? 22 Sababti majiro wah
gharsomey, hase laarke, mana gharsomin
wah, hase dahirante. 23 Ghofki dega wah
lugumaghlo leh, ha maghlo.

24 Wahu kuyiri: Firiya wahad magha-
shan; begidi ad begtan ya laidinkubegaya,
idinka maghlaysan wa laidin kordin. 25 Sa-
babti ninki hola leh wa lasinaya, kan
haysanina kuwu haystana wa lagaghadi.

26 Wahu yiri: Sidan way suldanimadi
Ilahey, sidu ninko uguaburayo abur dulka.
27 Asagana wa sehda, wa kaa haben iyo
malin, aburtana way bahda, oyweynata,
sidusan oghonin asaga. 28 Sababti dulka
keli gisa dala mira: horta deli, kabadi sabul,
kabadi saren adag sabulka korkisa.
29 Kolkey miraha bisladan, marko wahu
geya mindi, sababti bershafid bey gartey.

30 Wahu yiri: Mahan kalamid digna
suldanimadi Ilahey ? Ama mahmah sidee
ban kalamid digna ? 31 Wa sidi ininti
hardal, kolki luguaburo dulka, wa kayarta-

hay ininaha odan oduniyeda kuyalin,
32 ilowse kolki laaburo, way weynata, way
kadarnata khodarta odan, wahay bihisa
lama waweyn, tan iyo shimbirahi neawda
way kusodegi karan hos kodha hos tisa.
33 Wahu kulahadley hadalka mahmah
badan, onamnada tan ah intey maghli
karen. 34 Mahmah laana kulamaasan
hadlin, kuli wahu ugutafsirey asahab tisa
mel faragha ah.
35 Berigas kolkey eheyd makhrib, wahu
kuyiri: An ugudubno gedigas. 36 Wahay
ladardarmen makhlughi, wahay kughaden
donida sidu aha. 37 Doniya kale ba la-
jiren. Waha timid darbad weyno dabel
leh, hirarka wahay kudedeen donida, tan iyo
waha kabuhsantey biya. 38 Asagana wa-
hu kujirey sadaha, okuhurdey barkima.
Way keiyen, wahay kudehen: Maalin ma
isugu kamidba, hadan duno ? 39 Watosey,
wahu anantey dabesha, wahu kuyiri bada:
Amus ohasil. Dabeshi way damatey, wa-
hey noghotey shwar weyn. 40 Wahu ku-
dehey: Mahad utihin fuleya ? Sidee be-
ydnan iman uleheyn ? 41 Waha gashey
absi weyn, wahay iskulahadlen: Wayo kan
hade, dabesha iyo bada oymaghlan ?

## SURADA 5

1 Wahay garen bada gedigedha tan iyo
dalki Geraseni. 2 Kolku kadegey donida,
marko waha kasohorbahey ninko kaimadey
habalaha, oghabey jini, 3 okulaha sal haba-





laha, mana jirin nin kuhiri karey silsiladna.
4 Sababti mar badan ba luguhirey birhad
iyo silsilada, silsiladahina wau kalajebiyey
iyo birhadi wa laburburiyey, mana jirin
nin kaadkan karey. 5 Beri walbana, haben
iyo malin, wahu jogey habalaha iyo buraha
wa ughaylinayey, oudagaha iskugoygoyna-
yey. 6 Kolku kaarkey Yesu mel fog, wa
ordey, wa usujudey. 7 Wahu kudawa-
ghey od weyn, wahu yiri: Mahan kaghaba
adiga Yesu, Wilki Ilaha kor jira. Wan
kugudarinaya Ilahey, ha idibin. 8 Sa-
babti wahu kuyiri: Kabah jiniyehow nin
kan. 9 Wahu warsadey: Magaa ? Wa ja-
wabey, wahu kuyiri: Maga eyga wa Legion,
sababti wan badan nahay. 10 Ad bu
ubaryey yusan kadirine dal kas. 11 Waha
jogen burta kor kedha ul badan odonfara
ah odaghayen. 12 Way baryen jiniyedi
odan, wahay dehen: Nodir donfarada, an
galne ayaka. 13 Wa urughseyey markiba.
Way behen jiniyadi, wahay galen donfa-
radi; ushi wahay ugusotararahdey hog
gebiga oygalen bada, ayakana wahay aha-
yen in laba kun dan, baday kushiden.
14 Kuwi dajinayena donfarada way araren,
wahay garsiyen warkas beledka iyo beraha;
way sobahen, ha arkane wahi jirey. 15 Wa-
hay uimaden Yesu, wahay arken ninki
jiniga ghabey ofadiya oguntan onaaghli leh,
asagi ghabey Legion, ayakana way absaden.
16 Kuwi arken, wahay shegen wahi ku-
daey ninki jiniga ghabey iyo khabarki
donfaradi. 17 Wahay bilaben iney baryan,

ha agatage sohdin todha. 18 Asagana
kolku fuley donida, ki jiniga ghabey wa
tugey, ha lajire asaga. 19 Yesu maasan
aghbalin, ilowse wahu kujiri: Uka guri
gaga iyo dad kaga, ousheg waha weyn o
Ilahey kusubiyey, iyo sidu kugunaharistey.
20 Wa iskatagey, okabilabey inu kuwadiyo
Dekapoli waha weyn o Yesu usubiyey, kuli
way yaben.
21 Hadana Yesu kolku kugudbey donida
tan iyo gedigas, waha usoarurey makhlugh
badan, asagana wahu jogey bada agtedha.
22 Firi, waha yimid kuwi uweyna sunaguga
mid kodha maga isa Yairo; kolku arkey,
wahu kudaey luga hisa, 23 ad bu ubaryey,
wahu dehey: Geber teyda yar wa sakrad.
Wan kutugaya: Kaley, sar gaamaha, ha
bogsate eyadana waynolaneysa. 24 Wa
uraey, waha soraen dad badan, wayna
arariiriyen.
25 Waha jirtey nagto, okabahayey dig
12 sana, 26 waha dibey sanolowyal badan,
wahay bihisey mal kedha odan, wahba uma-
tarin, ilowse udur kedha wa kasidarey.
27 Kolkey maghashey khabarki Yesu, ga-
dal bey kagatimid makhlugha, wahay ta-
batey mara disa, sababti wahay tiri:
28 Hadan tabto marya hisa un, wan bogsa-
naya. 29 Marko wa engegey durdurki dig
gedha, wahay kagaratey kor kedha in
lagafayobeyey dib kas. 30 Marko Yesu
wahu kagartey nafti gisa, inu kabehey hog,
wahu kugadomey makhlugha, wahu yiri:
Ya igatabtey maryaha ? 31 Asahab tisa





wahay kuyirahden: Wad arkeysa ma-
khlugha sidu kuarariirinayo, adigana wa-
had ledahay: Ya itabtey ? 32 Wahu firiyey
barbar walba, ha arke eyadi subisey wah
han. 33 Nagtina absi bagashey iyo garir,
way garatey waha heley, way utimid, way
ukuftey, way uwadashegtey runto dan.
34 Wahu kuyiri: Geberyehey, iman kaga ku-
bogsiyey, ka kutag nabad, kabogso dib kaga.
35 Kolku hadlayey, dad ba kaimaden
gurigi ninki uweyna sunaguga, wahay de-
hen: Geber tadha way dimatey, mahad
udibeysa maalinka hadana ? 36 Marko,
Yesu kolku maghley hadalki luguhadlayey,
wahu kuyiri ninki uweyna sunaguga: Ha
absanin, amin keli. 37 Manaasan deynin
ghof, inu rao Petro mahee iyo Yaghub iyo
Yohana walalki Yaghub. 38 Wahay garen
aghalki ninki uweyna sunaguga, Wahu
arkey yon iyo dad oynayen, wahay subi-
nayen ohin badan. 39 Kolku galey, wahu
kuyiri: Mahad uyomi haysan od uoyni
haysan ? Geberta ma dimanin, ilowse way
huruda. 40 Ad bey ugughoslen. Asagana
gortu kabihiyey kuli, wahu watey geberta
aba hedha iyo habar tedha iyo kuwi lajiren,
gudahu galey, meshey kujirtey geberta.
41 Wahu ghabtey gaanti geberta, wahu
yiri: Talitha kumi, maana hedha: Geberye-
hay wahan kuleyahay, ka. 42 Marko way
jogsatey geberti, oysootey, sababti wahay
jirtey 12 sana. 43 Ad bey udeygagen.
Ad bu ufarey nina yusan oganin wah
han; wahu amrey in lasiyo hunguri.

## SURADA 6

1 Wa kabah̲ey meshas; wah̲una garey
dal kisa, asah̲ab tisa rae̲n. 2 Kolkey eheyd
sabato, wah̲u bilabey inu kubar osuna-
guga; kuwa badan kolkey maghlen way
deygagen, wah̲ay kuhadlen: Intebu kaheley
kan wah̲ h̲an? Iyo h̲igmad sidee olasiyey
kan, wa mah̲ay inshara han okusubsamayin
gaa̲ma hisa? 3 Kankada sow maaha ged
ghorki, wilki Maryan iyo Yaghub walal
kisa, iyo Yose iyo Yuda iyo Simon gebd̲a
walala hisa ahna, sow nalamajogan? 4 Way
neba̲den. Ilowse Yesu wah̲u kuyiri: Nebi
kama waynayo h̲ishmad dal kisa d̲ah̲disa
mahee iyo gharaba disa iyo guri gisa. 5 Asa-
gana kumaasan subin karin inshar h̲agas,
d̲owr jiran osgaa̲maha sarey mahee, osna-
fayobeyey. 6 Wah̲u kuyabey iman laan
todha.

Wah̲u kagawaregsadey buloyinka barbar
walba, osbarayey.

7 Wah̲u uyerey laba iyo tobanki, wah̲u
bilabey inu udiro laba laba. Wah̲u siyey
h̲og jiniyeda kor kodha. 8 Wah̲u amrey
wah̲ba yeyan ughadanin jidka, garun mahee,
kibis maaha ama ghandi ama besad kisada
d̲ah̲dedha, 9 ilowse ha gashaden kaba;
yeyan gashanin laba shulug. 10 Wah̲u
kud̲ehey: Mel walba od kagashan aghal,
farista tan iyo intad kabeh̲eysan meshas.
11 Kuwanan idind̲oweynin onan idinma-
ghlin, gortad jidka ghadan od kabah̲dan
h̲agas kad̲aband̲aba sigada idinkagatal a̲ga-





ha, ha kamaragka̲de. Amin wah̲an idinleya-
hay: Beled kas wah̲a kafududanaya Sodom
iyo Gomora berigi h̲ukunka. 12 Way be-
h̲en oywa̲diyen dadka ha tobad kenane.
13 Wah̲ay bih̲iyen jiniya badan, dad badan
ojiran bey salid mariyen, way bogsiyen.

14 Wah̲ h̲an wah̲a maghley suldan He-
rode, sababti maga i̲sa wa sodahirmey,
wah̲u yiri: Yohana Batisayo wa kasono-
ladey meydadka, sababtas h̲og gan wah̲u
kusubiya shughul gudahisa. 15 Ghar wa-
h̲ay dehen: Wa Eliya, gharna wah̲ay
d̲ehen: Wa nebi ama nebiyalka midkodha.
16 Gortu maghley Herode, wah̲u yiri: Yo-
hana on madah̲a kagoyey, asaga wa kasono-
ladey meydadka. 17 Sababti Herode na-
ftisa wah̲u udirey iney soghabtan Yohana,
wah̲u kuh̲irey geresada, Herodia daradedha,
nagti Filipo, Herode walal kisa. Sababti
wa gursadey eyada. 18 Sababti Yohana
wah̲u kuyiri Herode: H̲alal kumaaha inad
haysato nagti walal kaga. 19 Ilowse He-
rodia way nebe̲yd, wah̲ay rabtey iney
disho, maseayan karin, 20 sababti Herode
wah̲u kaabsadey Yohana, wa uoga inu
yahay nin hagh leh iyo nin ghudus ah, wa
uilaliyey. Gortu maghley, wah̲u aghbaley
wah̲ badan, oskumaghley furah̲ad. 21 Ko-
lkey noghotey berigi wah̲ tarka, h̲asusti
berigu dashey Herode, wah̲u usubiyey
karan shekhyalka iyo sefjidyalka iyo du-
gheyda Galilaya, 22 wah̲a so gashey
geberti Herodia naftedha, way deshey,
wah̲ay je̲leysisey Herode iyo kuwi lafad̲iyen,

suldanka wahu kuyiri geberta: Igatug
wahad rabto dan, wan kusinaya. 23 Wahu
ugudartey: Wahad igatugto dan wan kusi-
naya suldanima deyda bar kedna. 24 Way
bahdey, wahay kutiri habar tedha: Mahan
tuga ? Wahay tiri: Madahi Yohana Bati-
sayo. 25 Marko daghsey kugashe suldanka
hortisa, way tugtey, wahay tiri: Wahan
raba inad igusiso hadahalkan herada ma-
dehi Yohana Batisayo. 26 Suldanka ad
bu ualolhumadey; ilowse darta daradedha
iyo kuwi ufadiyen karanka maasan rabin
inu dido. 27 Marko suldanka wahu direy
askar, wahu amrey in lakeno madah hisa.
Wa ukaey, wahu kagasogoyey madaha
geresada, 28 wahu kukeney madah hisa
heradi, wahu siyey geberta, gebertana
wahay sisey habar tedha. 29 Asahab tisa
kolkey maghlen khabarka, way imaden, wa-
hay ghaden meyd kisa, wahay kuhabalen
ghaburto.

30 Rasuladana wahay usoaruren Yesu,
wahay ushegen khabarki wah walba, oysu-
biyen oynabaren. 31 Wahu kuyiri: Kaleya
idinka keligina mel faraghad ah an dad
lehen kunefsada kisto. Sababti waha jiren
kuwa badan oimanayen otagayen, manaayan
lehen nafas ay kuunana. 32 Wahay ku-
dofen donida tan iyo mel an dad lehen
keligodha. 33 Wahay arkayen, kolkey do-
fayen, kuwa badan ba garten, wahay isku-
laorden lugaha tan iyo meshas, wahay
kasobehen beledyalko dan, way garen
horta, way usoaruren. 34 Kolku kasodegey





Yesu donida, wahu arkey makhlugh badan,
wa unaharistey, sababti wahay ahayen sidi
ida on nin raa lehen, wahu bilabey inu baro
ayaka wah badan. 35 Kolku gabalka ga-
btey, asahab tisa way uimaden, wahay de-
hen: Mesha tan wa idla, hadana gabalka wa
gabtey. 36 Ladardaran kuwan ha ukaene
barbar walba beraha iyo buloyinka, hunguri
ha kagatane, sababti hunguri ma ghaban.
37 Wa jawabey, wahu kuyiri: Siya idinka
hunguri. Wahay kudehen: Ma ukana inan
kusogadno laba boghol dinar kibsa an sino,
ha unane ? 38 Wahu kuyiri: Megha kibsod
bad haysan ? Kaa sofiriya. Kolkey oga-
den, wahay dehen: Shan, iyo laba mala-
lay. 39 Wahu amrey iney farisiyan, ha
kuwadagene auska ghoyan korkisa. 40 Wa-
hay ufaristen saf saf, boghol boghol iyo
konton konton. 41 Wahu ghadey shanti
kibsod iyo labadi malay, wahu firiyey irka,
wu udueyey, wa jebjebiyey kibsahi, wahu
udibey asahab tisa, ha udigane, labadi
malayna wa ugheybiyey kuli. 42 Kuli-
godh way unen, oydergen. 43 Wahay aru-
riyen jabjabki laba iyo toban dembilod
obuhan iyo adadki malaygi. 44 Kuwi
unena kibsahi wahay ahayen shan kun
orag ah.

45 Marko wahu lasimiyey asahab tisa ha
fulane donida, ha hormarane iney ugudban
tan iyo Betsayda, intu asaga ladardarmayo
makhlugha. 46 Kolku ladardarmey, wahu
ukaey burta inu sotukado. 47 Kolkey eheyd
makhrib, donida wahay jogtey bada kala-

barkedha, asaga keligisa ba jogey ɗulka.
48 Wahu arkey ayaka okuɗibtonaya ɗo-
fida, sababti dabesha kahor imatey; kolkey
eheyd haben saadi sagalad, wa ukaey, wahu
kusoodey bada, wahu rabey inu modo.
49 Ayakana kolkey arken inu kusooda bada,
wahay umaleyen inu yahay efrid, way
abaden, 50 sababti kuli way arken, way
nehen. Asagana marko wa lahadley, wa-
hu kuyiri : Isghalbi adkeya, wa aniga, ha
absanina. 51 Wahu ufuley donida, da-
besha way ɗamatey, ad bey unehen, way
ghias ɗafen oyyaben, 52 sababti maayan
garan insharti kibsaha, sababti ghalbi godha
wa adka.
53 Kolkey gudben, wahay garen dalki
Genesaret, barosinkey digten hebta.
54 Kolkey kabehen donida, marko ɗadka
way garten asaga. 55 Orod bey kuwaregsa-
den dal kas oɗan, oybilaben iney kusogha-
dan kuwa jiran sariraha tan iyo meshey
kumaghlen inu jogo. 56 Meshu galeyba
buloyinka ama beledyalka ama beraha, wa-
hay ɗigen kuwa jiran sughyeda, way baryen
ha tabtene faraghi mara disa un, kuwi
tabten oɗana way fayobaden.

## SURADA 7

1 Waha usoaruren farisayalka iyo kuwi
fartayaghan ghar kodha, okasobahen Yeru-
salem. 2 Kolkey arken asahab tisa ghar
kodha okuunayen hunguri gaamaha nijasa
ah, mana hedha lamaɗaghin, way ananten.





3 Sababti farisayalka iyo Yahud kuligodh
inteyan gaamaha ad uɗaghin ma unan, wa-
hay haysten amaryadi dugheyda, 4 ha-
dana hadey kaimadan sugha, hadayan wey-
sa ghadan maunan, iyo wah badan okale ya
jiran oyaghbalen iney ghabtan, sidi loɗagho
fijamaha iyo dasadaha iyo ghalabki marta
iyo misaska. 5 Sa farisayalka iyo kuwi
fartayaghan wahay warsaden. Mahay
asahab tadha ugusoon weydey amaryadi
dugheyda, wahayse kuunan kibista gaama
nijasa ah ? 6 Wa jawabey, wahu kuyiri:
·Dab bu idin kusadiyey Isaya ardalayohow,
sidi lugudigey:
Dad kan wahay iguhishmeyan farurya-
ha,
ilowse ghalbi godha wa iga fog yahay.
7 Ayakana bilash bey iabudayin,
kolkey baran baridi amarki dadka.
8 Sababti wahad ɗaftan amarki Ilahey od
ghabatan amaryadi dadka, dasada iyo fija-
ma ɗaghid iyo kuwa badan oeynkas ah, yad
subisan. 9 Wahu kuyiri: Haghigha wahad
didan amarki Ilahey ad ghabsatane amarya
dina. Sababti Muse wahu yiri: 10 Hish-
mey abaha iyo habarta, iyo kihabara aba
his iyo habar tis ha uɗinto geri. 11 Idinka-
na wahad tirahdan: Ghofko hadu kuɗaho
abaha ama habarta: Wahan kutaro ɗan wa
korban, maana hedha sadagha; 12 hadana
uma dayneysan inu usubiyo wah aba hisa
ama habar tisa; 13 wahad kuburisan ha-
dalki Ilahey amarya dina odaghbashen;
hadana wahad subisan wah badan sidan

okale. 14 Hadana wah̲u uyerey makhlu-
gha, wah̲u kuyiri: I maghla kuli gina
ogarta. 15 Majiro wah̲ d̄ibeda ah ogala
ghof onijaseyn kara, ilowse wah̲i kasobah̲a
ghofka ya nijaseya. 16 Ghofki d̄ega lugu-
maghlo leh ha maghlo. 17 Gortu galey
aghalka, oskatagey makhlugha, asah̲ab tisa
wah̲ay warsaden ma̲nahi mahmah das.
18 Wah̲u kuyiri: Idinkana sow ma lihidin
aghli? Sow ma garaneysin wah̲ walba
odibeda ah, hadey galan ghof iney nijaseyn
karin? 19 Sababti kamagalayo ghalbiga,
a̲losha mahee, kabad̲i wah̲ay ubah̲an da-
rab oy d̄ahiriyan hunguriga kuli. 20 Wah̲u
yiri: Wah̲i kasobah̲a ghof, ya nijaseya ghof.
21 Sababti gudaha, ghalbigi dadka d̄ah̲disa
wah̲a kasobah̲aya fikarada h̲unh̲un: ma̲-
siya, dilid, 22 h̲atoyi, bakhelnima, h̲uman
sir, a̲malh̲uman, h̲asid, a̲ytin, kibir d̄ogho-
nima. 23 Wah̲a kan h̲un od̄an wah̲ay
kasobah̲an gudaha, ayakana nijaseyan
ghofka.

24 Wah̲u katagey h̲agas, wah̲u ukae̲y
sohdinti Turo iyo Sidon. Wah̲u galey
aghalko, wah̲u rabey inusan nina garanin,
ilowse maasan gharsomi karin. 25 Sababti
nagto, geber tedha jini ayghabtey, ya ma-
ghashey khabar kisa, way uimatey, wah̲ay
ugukuftey luga hisa. 26 Nag tas wah̲ay
eheyd grig, ghabil kedha Surofiniso waye.
Wah̲ay katugtey inu kabih̲iyo jiniga geber
tedha. 27 Yesu wah̲u kuyiri: D̄af ilmaha
horta, ha d̄ergane, sababti ma fia̲na in
laghado hungurigi ilmaha oloturo eïda.





28 Eyadana way jawabtey, wah̲ay kutiri:
Haa, Siydiy, eïdana miska hostisa yey
kau̲nan hambadi ilmaha. 29 Wah̲u ku-
yiri: Sababti hadal kan tag, jiniga waka-
bah̲ey geber tadha. 30 Kolkey imatey guri
ged̄ha, wah̲ay aragtey geberti olugujifiyey
sarirta, jinigina wa kabeh̲ey.

31 Hadana wah̲u kabeh̲ey sohdinti Turo
iyo Sidon, wah̲u yimid tan iyo badi Gali-
laya, sohdinti D̄ekapoli d̄ah̲dedha. 32 Wa-
h̲ay ukenen nin d̄ega la onsifia̲n uhadli
karin. Way baryen ha sare ga̲a̲meha.
33 Wah̲u kagasoe̲y makhlugha mel faragha
ah, wah̲u kageliyey fara hisa d̄egaha, wah̲u
tufey and̄ufa, oskatabtey a̲rab kisa, 34 wa-
h̲u firiyey kor i̲rka, wa a̲lolh̲umadey, wah̲u
kuyiri: Effatha, ma̲na hedha feydan.
35 Marko wa feydmen d̄ega hisa, wa debe̲-
dey guntinti a̲rabkisa, sifia̲n bu uhadley.
36 Wah̲u uamrey yeyan nina ushegin,
ilowse intu amrey, way kadaren iney she-
gan war kas. 37 Wah̲ay ugud̄eygagen
ghias laan, wah̲ay kuhadlayen: Wah̲u su-
biyey kuli fia̲n, kuwa d̄egaha laa wa subiya
ha maghlane, iyo kuwa a̲rablana ha ha-
dlane.

## SURADA 8

1 Berya has makhlugha ad bu ubadna,
hadana ayakana maayan ghabin hunguri.
Yesu wah̲u uyerey asah̲ab tisa, wah̲u
kuyiri: 2 Wah̲an unah̲arisanaya makhlu-
gha, sababti hada wah̲ay ilajogen sedah̲
beri, mahaystan hunguri. 3 Hadan ladar-

darmo ayaka osoman ha ukaene gurya
hodha, wahay kudimanayan jidka, sababti
ghar kodha wahay kaimaden mel fog.
4 Way ujawaben asahab tisa: Intebu ka-
karaya ghof inu kaderjio kuwan kibsa
gelgesha tan ? 5 Wa warsadey: Megha
kibsod bad haysan ? Wahay dehen: To-
doba. 6 Wahu amrey makhlugha iney fa-
ristan dulka; wahu ghadey todobadi kibsod,
wa skukri noghey, wa jebjebiyey, wahu
udibey asahab tisa ha siyane dadka, wahay
siyen makhlugha. 7 Wahay haysten dowr
kalun oyaryar, wu udueyey, wahu amrey
iney siyan kuwa kana. 8 Way unen,
oydergen, wahay ghaden hambadi todoba
dembila. 9 Kuwi unen wahay ahayen in
afar kun dan: 10 Markiba wahu fuley do-
nida asaga iyo asahab tisa, wahu ukaey
dinayadi Dalmanuth.
11 Way sobahen farisayalka, wahay bi-
laben iney lahadlan asaga, oykadonayen
insharti irka, way jirabayen. 12 Way alol-
humatey naftisa, wahu kuhadley: Mahu
udonaya fir kan inshar ? Amin wahan idin
leyahay: Lamasinayo inshar fir kan. 13 Wa
udafey, wahu fuley hadana donida, wahu
ukaey gedigas.
14 Asahabti wahay hilmamen iney ghatan
kibsa, donida dahdedhana kumaayan
haysanin kibisto mahee. 15 Wa amrey,
wahu dehey: Firiya, iskaogada khamirki
farisayalka iyo khamirki Herode. 16 Way
islashauren ayaka, wahay dehen: Maghabno
kibsa. 17 Yesuna kolku gartey, wahu ku-





yiri: Mahad ugushaureysan sababti kibis
mahaysatan ? Sow ma arkeysan weli, ma-
na garaneysan ? Ma ghalbi adag tihin tan
iyo hada ? 18 Inda bad ledihin, sow ma
arkeysan ? Sow mana hasusaneysan ?
19 Kolkan jebjebshey shanti kibsod, onsi-
yey shanti kun, megha dembila ba kabuhsa-
men jabjabki ad ghaden ? Wahay ku-
dehen: Laba iyo toban. 20 Kolki todo-
bada afar kun ansiyey, megha dembilod ba
kabuhsamen jabjabki ad ghaden ? Wahay
dehen: Todoba. 21 Wahu kuyiri: Sidee
beydnan ugaranin weli ?
22 Wahu garey Betsayda. Wahay uke-
nen nin indala, way baryen ha tabte.
23 Wahu ghabtey ninki indaha laa gaanta,
wahu uwadey bulada banan kedha, wahu
agatufey anduf indaha, wahu sarey gaa-
maha korkisa, wahu warsadey: 24 Wah
maarkeysa ? Wahu firiyey kor, wahu yiri:
Wahan arka dad, sidi geda ban uarka
owaregayan. 25 Kabadi wahu kasarey gaa-
maha hadana inda hisa, wahu urughseyey
inu kor firiyo, wa fayobadey, wa uarkey
kuli ghumati. 26 Wahu udirey inu ukao
guri gisa, wahu yiri: Ha galin bulada, nina
haagashegin bulada.
27 Yesu wahu ulakaey asahab tisa tan
iyo buloyinki Kaysariyadi Filipo, jidku ku-
warsadey asahab tisa, wahu kujiri: Dadka
yey igushegan aniga ? 28 Way ujawaben,
wahay dehen: Yohana Batisayo, ghar Eliya,
gharna nabiyalka midkodha. 29 Asagana
wa warsadey: Idinkana yad igushegtan

aniga ? Petro wa jawabey, wahu kuyiri:
Adiga Kristo bad tahay. 30 Ad bu uamrey
nina yeyan ushegin khabar kisa. 31 Wahu
bilabey inu baro, iney lasim Wilki Aden ad
udibayan, oyudidayan dugheyda iyo wa-
dadahi waweyna iyo kuwa fartayaghan,
wayna dilayan, sedah beri kabadina wa
sonolan, wahu kushegey hadal kas dahir.
32 Petro bawadey, wahu bilabey inu ana-
nto. 33 Wa gadomey, wahu firiyey asa-
hab tisa, wahu anantey Petro, wahu yiri:
Ka soo gadasheyda sheydanyehow, sababti
kamafikreysid wahi Ilahey, wahi dadka
mahee. 34 Wahu uyerey makhlugha iyo
asahab tisa, wahu kuyiri: Ki raba inu irao,
ha is dido naf tisa, ha sarto stalab tisa ha
irao. 35 Sababti ninki raba inu fakiyo naf
tisa, kas wa duminaya; ninki udumiyana
nolo shisa daradeyda iyo daradi anjil, kas
ba fakinaya. 36 Sababti mahu utari ghof
hadu aruriyo duniyeda odan, osdumiyo naf
tisa. 37 Mahuse ghof ubihin naf tisa be-
delkedha ? 38 Sababti ghofki igagahisho-
da aniga iyo hadal keyga fir kan maasiyada
iyo dembiga, Wilki Adena wa kahishon asa-
ga, kolku kuimanayo amanti aba hisa, asa-
ga iyo malaigyalki ghudus ah.

## SURADA 9

1 Wahu kuyiri: Amin wahan idinleyahay:
Kuwan inta jogan gharkodha ma arkayin
dimasha intey kaarkayan suldanimadi Ila-
hey, okuimaneyso hog.





2 Leh beri kabadi Yesu wahu watey
Petro iyo Yaghub iyo Yohana, wahu geyey
bur der korkedha mel faragha ah keligodha.
3 Waha lugu midab gediyey hortodha,
marya hisa way iftimen, ad bey uadaden
sidi duluj, siasan fundigi duniyeda uadeyni
karin. 4 Waha usobahey Eliya iyo Muse,
way lashekeysanayen Yesu. 5 Petro wa
jawabey, wahu kuyiri Yesu: Maalin, waha
fian inan jogno inta; on kadisno sedah bul,
midko adiga, midko Muse midkona Eliya.
6 Sababti maasan aghonin wahas kuhadlo;
sababti waha gashey absi weyn. 7 Waha
timid darur, wahay gelisey hos, waha kasobe-
hey od darurti: Kan wa Wil keyga an
jelahay, maghla asaga. 8 Kolkey kufiri-
yen ghaflad barbar walba, maayan arkin
ghofna Yesu mahee olajogey keli.
9 Kolkey kasodegayen burta, wahu ku-
amrey yeyan nina ushegin wahay arken, tan
iyo intu Wilki Aden kasonolanayo meyda-
dka. 10 Wahay ghabsaden hadal kas, way
iskawarsaden: Kasonolashadi meydadka ma-
hay tahay ? 11 Way warsaden, wahay de-
hen: Kuwi fartayaghan mahay dahan: Wa
shardu Eliya horta imado. 12 Wa jawabey,
wahu kuyiri: Haghigha Eliya horta wa
imani, ha subiye kuli. Wilki Aden maha
lugudigey in ad lodibayo oladarabayo ?
13 Ilowse wahan idin leyahay: Eliya ma-
dowu yimid, ayakana wahay kusubiyen
wahay raben odan sidi lugudigey.
14 Gortu uimadey asahab tisa, wahu
arkey makhlugh badan okuwaregsaden, iyo

kuwi fartayaghan way lamurmayen.
15 Marko makhlugha oḋan way arken, way
neh̲en, way orden oysalamen. 16 Wah̲u
warsadey kuwi fartayaghan: Mah̲ad kula-
murmeysan ? 17 Makhlugha midk̄odha wa
ujawabey, wah̲u yiri: Maa̲lin, wah̲an ku-
keney wil keyga oghaba jini a̲rabla; marku
ghabtaba, wu ḋifḋifta, 18 asagana abur
ba kaimada, ilkahu iskulisa, nafa buno-
ghda, wah̲an lahadley asah̲ab tadha, ha ka-
bih̲iyane, maayan karin. 19 Wa ujawabey,
wah̲u yiri: Firyehow onan aminsaneyn, tan
iyo gorman idinlajogaya ? Ikena. 20 Way
ukenen. Gortu arkey, marko jinigi wa
ḋifḋiftey, wah̲u kuḋae̲y ḋulka, wu ga-
langashey, abur ba k̄ayimid. 21 Wah̲u
warsadey aba his: Tan iyo gormu kuḋae̲y
wah̲ h̲an ? Wah̲u yiri: 22 Tan iyo yara-
nti: Mar badan wah̲u kuturey ḋab iyo
biya, ha ḋumiye, ilowse hadad wah̲ kareyso
nonah̲ariso onakalmey. 23 Yesu wah̲u ku-
yiri: Hadad amini karto, kuli wa lok̄araya
ki amina 24 Marko wilki aba his wa
ghayliyey ilin ba katimid, wah̲u yiri: Wan
aminsanahay, igukalmey iman laan teyda.
25 Yesuna gortu arkey dadka iney soordi
hayan, wah̲u a̲nantey jinigi, wah̲u kuyiri:
Jiniyohow a̲rabkala oḋegala, aniga wan ku-
amraya: K̄abah̲ hana galin mar kale.
26 Wu ghayliyey ad bu uḋifḋiftey, oska-
beh̲ey, wilkina wah̲u noghdey sidi meyd,
tan iyo badi wah̲ay ḋehen: 27 Wa ḋintey.
Ilowse Yesu wah̲u ghabtey gaa̲nta, osjo-
jiiyey, asagana wu jogsadey. 28 Kolku ga-





ley aghalko, asah̲ab tisa wah̲ay kuwarsaden
faragha: Mah̲an anaka ubih̲in weyney ?
29 Wah̲u kuyiri: E̲yn kan kumabih̲i karo
hadal kasta salad iyo son mahee.
30 Way katagen meshas, wah̲ay ghaden
jidka oyḋah̲maren Galilaya. Asagana maa-
san rabin nina inu ogado, 31 sababti wah̲u
barayey asah̲ab tisa, oskuyiri: Wilki Aden
wah̲a lagelinaya gaa̲mahi dadka, wayna
dilayan, kolki ladilana, wu sonolanaya
sedah̲ beri kaba̲di. 32 Ayakana maayan
garanin hadal kas, way kaa̲bsaden iney
warsadan asaga.
33 Wah̲ay garen Kapernaum; kolku kuji-
rey aghalka, wa uwarsadey: Mah̲ad kumu-
rmeysen jidka ? 34 Way amusen, sababti
wah̲ay iskulahadlayen: Kee weyn ? 35 Wa
ufaristey, wah̲u uyerey laba iyo tobanki,
wah̲u kuyiri: Ki raba inu dalao̲ wa kada-
mbeynaya kuli. 36 Wah̲u ghadey a̲nug,
wah̲u jojiyey ḋah̲dodha, wu h̲ambarey, wah̲u
kuyiri: 37 Ghof hadu kuaghbalo a̲nugo
sidan maga e̲yga daradisa, anigu iaghbaley,
ghofna hadu iaghbalo aniga, aniga ima-
aghbalin, ilowse ki isodirey.
38 Yohana wa jawabey, wah̲u kuyiri:
Maa̲lin, wah̲an aragney ninko kubih̲iya
jiniya maga a̲ga namanarao̲, anaka wan
udidney, sababti namarao̲: 39 Yesu wah̲u
yiri: Ha udidina, sababti majiro ghof kusu-
binaya inshara maga e̲yga, omarna h̲uman
igushegi kara. 40 Sababti nin kan narebe-
ynin wa barbar kayna. 41 Sababti mid
walba oidin kuwarabiya fijan biya maga

eyga, sababti wahad tihin dadki Kristo,
amin wahan idin leyahay: Ajar kisa ma
dumayo marna. 42 Mid walba ogefiya
yaryar kan midkodha, oiaminsan, waha
uron in lagasolulo shid ghor tisa oluguturo
bada. 43 Gaan tadhana hadey kugefiso,
iskagoy, waha kuron inad gasho nolosha
adin laan, waha kagadaran inad gasho
narta, adiga olaba gaama leh dabkanan
demin dahdisa, osan kadamanin dehiri
godha, dabkana ma demayo. 45 Lug ta-
dhana hadey kugefiso iskagoy, waha ku-
ron inad gasho nolosha adiga ohokola, waha
kagadaran adiga oleh laba lugod in luguguturo
turo narta, 46 dabkanan demin dahdisa
osan kadamanin dehiri godha, dabkana ma
demayo. 47 Ishadana hadey kugefiso iska-
rid, waha kuron inad gasho suldanimadi
Ilahey adiga oilla, waha kagadaran adiga
oleh laba inda oluguguturo narti jehanum;
48 osan kadamanin dehiri godha, dabkana
mademayo. 49 Sababti ghof walba waha
kadedemaya dab, iyo dhabih walba waha
kadedemaya usba. 50 Usba wa fian tahay,
ilowse hadeyan dananeyn usbada, sidee
bad udananeyneysan. Usba kuyesha guda-
hina, idinkana iskulafadiya nabad.

## SURADA 10

1 Wahu katagey hagas osimadey tan iyo
sohdinti Yudea, jidki Yordan gedigisa. Ha-
dana makhlugh badan ba uimadey asaga,
wahu ubarey sidi dastur tisa. 2 Waha





uimaden farisayalka, wahay warsaden: Ma
uhalalba nin inu furo nag tisa ? Way jira-
bayen. 3 Asagana wa jawabey, wahu ku-
yiri: Mahu idinkuamrey Muse ? 4 Ayakana
wahay dehen: Muse wahu aghbaley in ladigto
khadki dalaghda, olafuro. 5 Yesu wa jawa-
bey, wahu kuyiri: Adkanti ghalbi gina dara-
disa yu idinkudigey amar kas, 6 ilowse
tan iyo bilawgi umida, Ilahey wahu umey
nin iyo nag. 7 Sabab tas nin wahu iskada-
faya aba his iyo habar tisa, wahu iskuka-
baya nag tisa. 8 Laba dodhana wahay
noghonayin korko, mana ahanayin laba,
korko mahee. 9 Wahi Ilahey iskukabey
yusan kalafurin binow Aden. 10 Aghalki
guda hisa yey asahab tisa hadana kaga-
warsaden khabarki. 11 Wahu kuyiri: Ninki
fura nag tisa ogursada mid kale, wa kamasi-
yeysta; 12 nagna hadey deyso nin kedha
oygursato mid kale wa masiyeysata.

13 Wahay ukenen ilma, ha tabte, asahabti
wahay ananten kuwi kenen. 14 Yesuna
kolku arkey, rali kumaehen, wahu kuyiri:
Daya arurta, ha iimadane, ha rebina, sababti
kuwi ueg kuwan suldanimadi Ilahey ayaka
leh. 15 Amin wahan idin leyahay: Mid
walba onan kuaghbalin suldanimadi Ilahey
sidi anug ma galayo marna. 16 Wa hamba-
rey, wau udueyey, wahu sarey gaamaha.

17 Kolku usobahey inu ukao jidka, ninko
ba soordey, wa ujilba jogsadey, wa uwarsa-
dey: Maalin fian, mahan subiya an dahle
noloshi weligedh ? 18 Yesu wahu kuyiri:
Mahad igushegi fianan ? Majiro mid fian

midko mahee, wa Ilahey. 19 Wad taghan
amaryada: Ha dilin, ha masiyeysanin, ha
hadin, ben ha kamaragkiin, ha sirin, hishmey
abaha iyo habarta. 20 Wahu kuyiri: Maalin
wah han kuli wan ghabtey tan iyo arurnima
deydi. 21 Yesu wa ufiriyey, wa ujeladey,
wahu kuyiri: Waho ba kadiman, ka gad
wahad ledahay odan, osi masakinta, adigana
wahad kulahaneysa khasanad irka, kaley
ghado stalabta, oira. 22 Asagana folku ka-
dudey hadal kas dara disa, wahu kutagey
murug, sababti wahu laha mal badan.

23 Yesu wahu firiyey barbar walba, wahu
kuyiri asahab tisa: Sidey uahaneyso dib nin
dureysa ah inu galo suldanimadi Ilahey.
24 Asahabti way kuyaben hadal kisa. Yesu
wa jawabey, hadana wahu kuyiri: Ilmayo-
how, sidey uadag tahay, kuwi kutirsada
malka iney galan suldanimadi Ilahey!
25 Waha kafudud rati inu kaduso irbad dulel
kedha nin tajir ah inu galo suldanimadi
Ilahey. 26 Ayakana wahay kunehen ghiyas
laan, wahay iskulahadlen: Ya fakan kara
hade? 27 Yesu wahu firiyey ayaka, wahu
yiri: Dad lugumakarayo Ilahey mahee; sa-
babti kuli Ilahey wa kara. 28 Sa Petro
wahu bilabey inu kudeho: Firi anaka wan
dafney kuli, onkuraney adiga. 29 Yesu
wa jawabey, wahu yiri: Amin wahan idinle-
yahay: Majiro ghof dafey guri ama walala
ama gebda walala ah ama aba ama habar
ama nag ama ilma ama bera daradeyda
iyo anjilka daradisa, 30 onan logudeynin
boghol gor wakhti gan; guri iyo walala iyo





gebda walala ah iyo ilma iyo bera kolki
eriska iyo wakhtigi iman dono noloshi weli-
gedh. 31 Ilowse kuwa badan okuwi hore
ah, wahay noghonayin kuwi dambe, iyo
kuwa dambena wahay noghonayin kuwi
hore.

32 Wahay jogen jidka, wahay usooden
tan iyo Yerusalem, Yesu wa kahoreyey, way
nehen, wahay kuraen absi. Hadana wahu
watey laba iyo tobanki, wahu bilabey inu
ushego wahi heli dono. 33 Wahu kuyiri:
Firiya, wahan usoona tan iyo Yerusalem,
Wilki Aden wa lobihinaya wadadahi wa-
weyna iyo kuwi fartayaghan, ayakana wahay
kuhukumayin dimasha, wahayna ugeynayan
kafiryalka, 34 wayna kuayarayan, wahay
kudufanayan jedal, wahay kutufayan anduf,
wayna dilayan, beriga sedahadna wauso-
nolanaya.

35 Waha uimaden Yaghub iyo Yohana
wilashi Sebedayo, wahay kudehen: Maalin
wahan rabna inad noyesho, wahan katugno
dan. 36 Wahu kuyiri: Mahad rabtan inan
idinsubiyo? 37 Wahay kudehen: Nasi
anfarisane midko midig tadha midna bidah
dadha aman tadha dahdedha. 38 Yesu
wahu kuyiri: Mataghanin wahad tugeysan.
Ma abi kartan fijanka onabo, onalaidinku-
batisa batiski laigubatisey? 39 Wahay ku-
dehen: Wan karna. Yesu wahu kudehey:
Fijanka onabo wad abeysan, batiski laigu-
batiso yalaidinkubatisi. 40 Ilowse fadigi
midig teyda iyo bidah deyda amar kumalihi
inan idinsiyo, ilowse waha lasin kuwi lodigey

tayar. 41 Tobanki kolkey maghlen wah
has, wahay bilaben iney kudirfan Yaghub
iyo Yohana. 42 Yesuna wau uyerey, wahu
kuyiri: Wa taghanin, kuwi loogyahay dau-
ladi dadka wa utaliyan, kuwi kawaweyna
wahay kughaban tala korkodha. 43 Ilowse
sidas ma noghoneyso dahdina, ilowse ghofki
raba inu kuweynado dahdina, wahu nogho-
naya madidin kina. 44 Ninki raba inu
noghdo ki hore dahdina, wahu noghonaya
adonki kuli. 45 Sababti Wilki Aden umai-
manin in loadego, ilowse inu adego iyo inu
bihiyo noloshisa hafurte kuwa badan.
46 Wahay garen Yeriko, kolku kalasoba-
hey asahab tisa iyo makhlugh badan Yeriko,
wilki Timayo ki indahalaa, maga isa Barti-
mayo, wahu fadiyey jidka barbar kisa, wa
tugsanayey. 47 Kolku maghley inu yehay
Yesu ki Nasaret, wahu bilabey inu ghayliyo
oshadlo: Yesu Wilki Daud inahariso. 48 Dad
badan ba ananten ha amuse, ilowse asaga wa
kadarey inu kughayliyo : Wiki Daud inaha-
riso. 49 Yesu wa jogsadey, wahu yiri, ha
loyero. Wahay uyeren ki indahalaa, wahay
dehen: Ha absanin, jogso wau kuyeraya
50 Wahu turey mara disa ojogsadey osu-
kaey Yesu. 51 Yesuna wa ujawabey, wahu
kuyiri: Mahad rabta inan kusubiyo ? Ki
indahalaa wahu kuyiri: Maalin, inan arko.
52 Yesu wahu kuyiri: Ka iman kaga kufa-
yobeyey. Marko wahu heley inu arko,
wahu uraey Yesu jidka.





## SURADA 11

1 Kolkey kusodowaden Yerusalem iyo
Betfage iyo Betaniya burti Seytuni agtedha,
wahu kadirey laba asahab tisa, wahu kuyiri:
2 Ukaa tan iyo bulada idinkusotoseysa,
markad gashan, wahad arkeysan khel lahirey
onina fulin weli, fura okena. 3 Hadu ghof
idindoho: Mahad sidan usubineysin ? Daha:
Adér bamuhtaj uah, marko wahu usodibi
inta. 4 Way tagen, wahay helen khel oku-
hiran irida agtedha jidka dahdisa. Way
furen. 5 Gharkodha kuwi jogen hagas, wahay
kudehen: Mahad subineysin odufureysin
khelka. 6 Wahay kudehen sidu Yesu farey;
way dafen. 7 Wahay ukenen Yesu khelki,
wahay kukoreyen marya hodha, wa uku-
faristey. 8 Dad badan wahay kufidiyen
marya hodha jidka, gharna wahay kagoyen
gedaha lama oydigen jidka. 9 Kuwi ho-
reyen iyo kuwi raen way ghayliyen, wahay
dehen: Hosana, wa dueysan yahay kan
kuimanayo magai Rabi ! 10 Wa dueysan
tahay suldanimadi aba hayna Daud okuima-
neysa magai Rabi ! Hosana kor irka !
11 Yesu wahu galey Yerusalem iyo
betmaghdeska gudahisa. Kolku firiyey kuli,
wahay eheyd makhrib, wahu ulakaey
Betaniya laba iyo tobanki.
12 Subahdi kolkey kabehen Betaniya, wa-
ha ghabatey bahi. 13 Wahu ka arkey mel
fog gedki tini oalen leh, wa uimadey, wah
kumahelin alen mahee, sababti maehen
wakhtigi miraha. 14 Yesu wa jawabey,

wahu kuyiri: Tan iyo manta iyo weliga
ghofna yusan kaunin mira. Asahab tisa
way maghlen.
15 Wahay garen Yerusalem, Yesuna wahu
galey betmaghdeska, wahu bilabey inu eriyo
kuwi kugadayen iyo kuwi kagadanayen
betmaghdeska gudahisa, wahu gediyey miski
kuwa sarifa laagta, iyo gembaradi kuwa ga-
dayen gholey; 16 nina umaasan deynin inu
lamaro ghalab betmaghdeska gudahisa.
17 Wau barey, wahu kuyiri: Sow luguma-
digin: Aghal keyga waha loguyeri aghalki
salada dadka odan ? Idinkana wahad ka-
digten gharki tugaga. 18 Wadadahi wa-
weyna iyo kuwi fartayaghan wahay maghlen
khabarka oydonen sey udumiyan, sababti
way kaabsaden, sababti makhlugha odan
wahay kuyaben ilmi gisa.
19 Kolkey noghotey makhrib, wahu gha-
btey jidka oskabehey beledka.
20 Subahdi kolkey marayen gedki tiniga,
wahay arken asago kaengegey hididadana.
21 Sa Petro wa hasustey, wahu kuyiri:
Maalin firi tinigi ad habartey waengegey.
22 Yesu wa jawabey, wahu kuyiri: Yesha
imanki Ilahey. 23 Amin wahan idinleya-
hay: Mid walba okudehi dona bur tan: Rugh
ha luguguture bada, yusan kawaswasin
ghalbi gisa, ilowse wa uamini iney noghoni
wahu doho, wahay unoghoni sidas doho
odan 24 Sabab tan wahan idin leyahay:
Wah walba odrabtin, kolkad tukaneysan,
amina wad heleysane wadna heli dontan.
25 Idinkana kolkad utagan tihin salad





afiya, hadad ghof il ughabtan; Aba hina irka
jirana ha idinafiye gef kina. 26 Ilowse ha-
deydnan afinin, Aba hina irka jirana idin ma
afinayo gef kina.
27 Hadana wahay garen Yerusalem.
Kolku kuwaregayey betmaghdeska, waha ui-
maden wadadahi waweyna iyo kuwi farta-
yaghan iyo dugheyda, wahay kudehen:
28 Amar kee bad kusubisa wah han, yana
kusiyey amar kan ad kusubiso wah han.
29 Yesu wa jawabey, wahu kuyiri: Anigana
wahan idinwarsanaya hadalko; ijawaba, ka-
badi wan idinshegi amar sidee ban kusubiya
wah han. 30 Batiski Yohana ma wahu
kayimid irka ama dad ? Ijawaba. 31 Way
islahadlen dahdodha, wahay dehen: Hadan
dahno irka yukayimid, wahu dehi: Mahad
uamini weysen hade ? 32 Ilowse hadan
dahno: Dad bukayimid, wahay kaabsaden
dadka, sababti kuli wahay arken Yohana inu
yahay nebi run ah. 33 Way jawaben, wa-
hay kudehen Yesu: Ma naghan. Yesuna
wahu kuyiri: Anigana idin ma shegayi amar
sidee ban kusubiya wah han.

## SURADA 12

1 Wahu bilabey inu kuhadlo mahmah.
Ninko wahu aburey sabib. Wahu kuwa-
rejiyey sibad. Wahu ghodey godki masa-
rada, wahu disey mnarad, wahu uijareyey
berfal, osusafrey dal fog. 2 Kolkey gartey
wakhtiga, wahu udirey berfaloyinki adonko
ha kasohele berfaloyinki mirahi sabibta.

3 Way ghabten, way garaen, oykudiren gaa·
malalad. 4 Hadana wahu udirey adon kale.
Kas wahay kagadakhren đagah madaha,
wahay kudiren eb. 5 Wahu direy mid kale,
kas way dilen, iyo kuwa kale obadan, ghar
way garaen, gharna way dilen. 6 Hadana
wahu ghabey wilko, asagana wa ujela; marki
dambe wahu direy asaga, wahu đehey: Wa-
hay kaabsanayin wil keyga. 7 Ilowse berfa-
loyinki wahay đehen: Kan wa kiđahlilaha,
kaleya andilne đahalkana anaka lahaneyna.
8 Way ghabten, way dilen, oykuturen sa-
bibta banan kedha. 9 Mahu subin hade
ninki laha sabibta ? Wa imani, wahu đumin
berfaloyinki, sabibtana wahu uđibaya kuwa
kale. 10 Sow maidnan akhrinin đigidana:

Đagahay diden fundiyalka,
kas wahu noghdey aradi geska.
11 Wah han wa shughulki Ilahey,
wahu kuyahay yab inđa hayna hor-
todha ?

12 Wahay donen iney ghabtan, wahayse
kaabsaden makhlugha, sababti way garten
inu mahmah das kushegey korkodha. Way
đafen, way iskatagen.

13 Wahay udiren farisayalka iyo dadki
Herode ghar kodha, ha kuhirane hadal.
14 Kolkey imaden, wahay kuđehen: Maalin,
wan kunaghan inad tahay nin run ah, ka-
mana absaneysid ghof, sababti ma firineysid
ghof midab kisa, ilowse wahad kubarta run
jidki Ilahey: Ma halalba in lasiyo kaysarka
anshur ama maya ? Ma bihina ama maey-
nan bihineyno ? 15 Asagana wahu gartey





khayana dodha, wahu kuyiri: Mahad ijira-
beysin ? 16 Ikena đinarka an arke. Way
kenen. Wahu kuyiri: Yaleh masawar kan iyo
alwan kan ? Wahay kudehen: Kaysarka.
17 Yesu wa jawabey, wahu kuyiri: Uguda
kaysarka wahu kaysarka leyahay, iyo Ilahey
wahu Ilahey leyahay. Ad bey uguyaben.

18 Waha uimaden sadukayal, kuwa đahan
majirto ghiyama, way warsaden, wahay
đehen: 19 Maalin, Muse wahu nođigey,
ghof walal kisa hadu đinto osđafo nag asagon
lehen ilma, walal kisa hadumalo, ha uđale
owlad walal kisa. 20 Waha jiren todoba
walala ah. Ki hore wahu gursadey nag, wu
đintey, ma đafin owlad, ki labad ba ghatey,
21 wu đintey mana đafin owlad; ki seda-
hadna sidas okale. 22 Waha ghaten todo-
badiba, manaayan đafin fir. Gadashodha
kuli nagtina way đimatey. 23 Bes ghiya·
mada đahdedha, kolkey sonoladan yay uno-
ghon donta nag ? Sababti todobadaba way
gursaden. 24 Yesu wa jawabey, wahu ku-
yiri: Sow sabab tas iskumasirtan, sababti
ma taghanin đigida iyo hogi Ilahey. 25 Sa-
babti kolkey kasonoladan meydadka, ma
gursanayin lamana gurinayo, ilowse wa sidi
malaigyalka irka jogan. 26 Iyo khabarki
meydadka korkodha iney sonolanayin, sow
kamaeydan akhrinin kutubki Muse, meshi
hananka, sidu kuyiri: Aniga Ilahi Ibrahim
ah iyo Ilahi Isagh iyo Ilahi Yaghub ?
27 Maaha Ilahi meydadka, wase ki kuwa
nol, ad bad isusirtan.

28 Waha imadey kuwa fartayaghan mid-

kodha omaghley ayako murmayan, wahu
gartey inu sifian ugujawabey. Wahu warsa-
dey: Amar kee ba kahoreya kuwa kale
odan ? 29 Yesu wahu ujawabey: Ki ka-
horeya amaryado dan wa kan: Maghal,
Israel! Ilahey Rabi gayna wa Rabigo,
30 kujelow Rabi Ilah haga ghalbi gadho
dan, iyo naf tadho dan, iyo aghli gadho dan
iyo hog gadho dan; kan wa amarki hore.
31 Kan labadna wa uegyahay; Ujelow jiran
kaga sidi naftadha. Ma jiro amar kale oka-
weyn kuwan. 32 Ki fartayaghan wahu ku-
yiri: Wa run maalin, sifian bad uhadashey
inu Ilahey midko yahay, mid kale ma jiro
asaga mahine, 33 in lugujelado ghalbigo
dan iyo garashado dan iyo nafto dan iyo
hogo dan iyo in lojelado jiranka sidi naf-
tadha, wahay kaweyn tahay kafarado dan
iyo dhabih. 34 Yesu kolku arkey inu ku-
jawabey aghli, wahu kuyiri: Kama fogid
suldanimadi Ilahey. Kabadi ghofna kuma
dein inu warsado hadal.
35 Yesu wa jawabey, wahu yiri, kolku
kubarayey betmaghdeska: Mahay kuhadlan
kuwa fartayaghan Kristo inu yahay wilki
Daud ? 36 Sababti Daud naftisa wahu
kuhadley hogi Nafta Ghudus ah:

Ilahey wahu kuyiri Siydiy keyga:
Fadiso midig teyda tan iyo intan kage-
linayo adowa dadha aga hadha hostodha.

37 Daud naftisa wahu uguyerey Siydiy,
intes kanoghonaya wil kisa ? Dad badan
makhlugha dahdisa ad bey ujeladen iney
maghlan.





38 Wahu kuyiri bari disa dahdedha:
Iskaogada kuwa fartayaghan, oraban iney
kuwaregan marya derder iyo salanti sugha
39 iyo mesha hore sunagugyalka guda ho-
dha iyo gembaradi hishmada karanka dahdo-
dha, ounan aghaladi garobyalka, 40 ardal-
nimey utukadan; kuwas wahay helayin hu-
kun kadaran.
41 Yesu wahu fadistey mel kutosan sandu-
khi sadaghada, wahu firiyey sidi dadka
ayuguridayen laagta sandukha. Tajirina
badan wahay kuriden wah badan. 42 Waha
imatey nagto garob omaskin ah, wahay
kuridey laba ardi manahedha besad barke-
dha. 43 Wahu uyerey asahab tisa, wahu
kuyiri: Amin wahan idin leyehay: Garob tan
maskinta ah wahay kuridey wah kabadan
wahay kuwan kuli kuriden sandukhi sada-
ghada, 44 sababti kuwas kuli wahay kaga-
riden wahi kabatey, ilowse tan maskinima
dedha dahdedha wahay kuridey wahay
haysatey odan, tan iyo risighedha odan.

## SURADA 13

1 Kolku kasobaheyey betmaghdeska, asa-
hab tisa mid kodha wahu kuyiri: Maalin
firi dagah sidee iyo disid sidee! 2 Yesu
wa jawabey, wahu kuyiri: Ma aragta disid
dan waweyn ? Inta kumaharayo dagah
dagah kale kor kisa onlafujineynin.
3 Kolku fadiyey burti Seytuni kor kedha
betmaghdeska tos kisa, Petro iyo Yaghub
iyo Yohana iyo Andrea wahay kuwarsaden

faragha: 4 Nosheg, wah han gormey nogho-
nayin. Mahay tahay insharaday kudaman
donan wah han kuli ? 5 Yesu wa jawabey,
wahu bilabey inu kuyirahdo: 6 Iskaogada
nina yusan idinsirin, sababti kuwa badan
wahay kuimanayin maga eyga, wahay da-
hayan: Wa aniga, wahayna sirayan kuwa
badan. 7 Hadana kolkad maghashan ol
iyo khabarki ol yan laidin absinin, sababti
wa lasim wah has iney noghdan, ilowse
akhersaman weli maimanin. 8 Sababti gha-
bil wahu ukai inu laharbiyo ghabil, iyo sulda-
nima suldanima korkedha, wahay noghoni
garirki dalka mel mesho; wah han wa
bilowgi dibki fosha.

9 Idinka isogada naftina, sababti wahay
idingeynayin bersadaha olaidinkugaraaya su-
nagugyalka guda hodha, wana laidingeynaya
sagalayalka iyo suldamaha hortodha dara
deyda, ha unoghote marag. 10 Wana lasim
horta in luguwadiyo anjilka ghabil walba
dahdisa. 11 Gortey idinwadan oy idinbi-
hiyan, horta ha iskudibina wahad dihi do-
ntan, hana kafikirina, ilowse wahi laidinsiyo
odan saa das, wahas kuhadla, sababti idinka
ma hadleysan, ilowse wa Nafta Ghudus ah.
12 Walalna wahu bihin walal kis ha ladile,
abana anug gisa, ilmahana wahay kukaayin
walid kodha, wahay ukenayin ajal. 13 Wana
idinnebanayin kuli maga egya daradisa,
ilowse ki stahmila tan iyo gadal ya fakanaya.

14 Ilowse kolkad aragtan nebanti haley-
ska, ti ukuhadley nebi Daniel, otagan meley
stahil kuaheyn, ki akhriyana ha garto,





wakhtigan kuwi fadiyan Yudea, ha uararan
buraha, 15 iyo ki fula sarta korkedha, yu-
san usodegin aghalka, yusan galin inu kagha-
to ghalab aghal kisa, 16 ki jira berta, yusan
gadal usonoghonin inu ghato mara disa.
17 Wa hog godha kuwi ur leh onujiyan
berya has ! 18 Tuga wah has yeyan nogho-
nin wakhtigi dahanta. 19 Sababti berya
has wahay noghoneysa dib, siayan noghonin
tan iyo bilowgi unka uumey Ilahey tan iyo
hada, mana noghoneyso marna. 20 Hadu-
san Ilahey yareynin berya has ma fakaden
korkasta, ilowse kuwi dor ah dara dodha
oudorey wa uyareyey berya has. 21 Hadu
ghof idindoho kolkas: Firi, Kristo wahu
joga meshan ama meshas, ha aminina,
22 sababti waha kaayan kuwa iskushegan
Kristo, iyo nebiyal ben wahay subinayan
inshara iyo yab, ha sirane kuwi ladoreyna
sidey karan. 23 Idinka iskaogada. Firiya,
wan idinshegey kuli horta.

24 Ilowse berya has dib kas kabadi gho-
rahda way madobaneysa, dayahana ma
bihi nayo nur kisa, 25 iyo hedigahana wahay
kasodaayan irka iyo, hogaga irka way gariri
donan. 26 Kolkasey arki donan Wilki Aden
okusosoda daruraha iyo hog badan iyo
aman. 27 Kolkasu diri dona malaigyal ki-
sa, asagana wahu kasoarurinaya kuwu dor-
tey afarta jaha, tan iyo sohdinti duniyeda
tan iyo sohdinti irka.

28 Gedki tini kubarta mahmah; lan tisa
kolkey urdun tahay, alenta ay sobahdey,
sa wad kaseysin wakhtigi robka inu sodow-

yahay, 29 sidas idinkana, kolkad aragtan
iney noghoneyso waẖ ẖas, garta iney kuso-
dow yihin irida. 30 Amin waẖan idinleya-
hay: Fir kan ma modayo marna tan iyo
intey kanoghoneyso waẖ ẖan odan. 31 I̱rka
iyo duniyeda wa gadomayin; hadal keygase
mamodayo marna. 32 Ilowse khabarki beri
gas iyo saa̱ das ma jiro ghof yaghan malai-
gyalka i̱rka jirana ha ahate ama Wilkana,
Abaha mahee. 33 Firiya, sojeda, otukada,
sababti ma taghanin kolkey noghoneyso
wakhti gas. 34 Wa sidi ninko usafrey
dal fog, waẖu dafey guri gisa, waẖu siyey
adoma disa amar nin walba shughul kisa,
waẖu amrey ninki jogey irida ha sojedo.
35 Sojeda, sababti ma taghanin gortu ima-
nayo ninki guriga laha, makhrib ama haben
barki ama gortu yerayo digha ama subaẖdi,
36 kolku kuimanayo ghaflad, yusan idin-
kusogarin hurdada. 37 Waẖa kan anidi-
nkudahayo, waẖan kuleyehay kuli: Sojeda.

## SURADA 14

1 Laba beri kaba̱di waẖay noghotey Pa-
saka iyo idi kibista ankhamirka lugudarin;
wadadahi waweyna iyo kuwi fartayaghan
waẖay donen iney kughabtan ẖilad ha di-
lane. 2 Waẖay dehen: Maaha beryahi ida,
yeyan kunoghonin ghasiyad dadka daẖ-
dodha.

3 Asagana kolku jogey Betaniya gurigi
Simon ki fantada ghabey, osufadiyey u̱ntada,
waẖa imatey nagto, waẖay wadatey ghura-





rado alabastro ah, marẖamki nardo khalis
otaman leh, waẖay jebisey ghuraradi oy
kagashubtey madaẖ hisa. 4 Kuwi kujiren
ghar kodha waẖay ka dirfen ghalbi godha
oy dehen: Maẖu kunoghdey beytimal kan
marẖamka? 5 Sababti waẖa lugugadi kari
laha sedaẖ boghol odinar ah kabadan, olasin
laha masakinta, ad bey uguganunue̱n eyada.
6 Yesu waẖu yiri: iskadafa, maẖad uge-
lineysin dib? Waẖay isubisey shughul
fia̱n; 7 sababti beri walba masakinta way
idinlajogan, kolkad rabtan odan, wahad usu-
bin kartan waẖ fia̱n, ilowse aniga idinlama-
jogi beri walba. 8 Waẖay subisey sidey
kartey, way hormartey iney imariso marẖam
korka sababti dug teyda. 9 Amin waẖan
idinleyahay: Mel walba oluguwa̱diyo anjil
kan duniyeda odan, waẖay subisey tan wa
loguhadli ẖasus tedha.

10 Yuda Iskariote mid kodha laba iyo
tobanka, waẖu ukae̱y wadadahi waweyna,
ha geliye Yesu gaa̱ma hodha. 11 Ayakana
kolkey maghlen, way farẖen, waẖay ku-
balamen iney siyan laa̱g. Waẖu doney si
as kuhelo nafas ukubiẖiyo.

12 Berigi hore oidi kibista ankhamirka
lugudarina kolkey gowrae̱n pasaka, asaẖab
tisa waẖay kudehen: Inte bad rabta an
uka̱ne inan subino adu̱ntide pasaka?
13 Waẖu direy asaẖab tisa labadodh, waẖu
kuyiri: Beledka ukaa̱, waẖa idinkahoriman
ninko, owata ashun biya ah, raa̱. 14 Meshu
galo, ushega ninka aghalka leh: Maa̱linka wa-
ẖu leyahay: Me gholki martida an kulau̱ne

pasaka asahab teyda ? 15 Kan lehna wahu
idin tusaya ghol weyn okor kuyal, olawa-
najiyey otayar ah, nodiga. 16 Way behen
asahab tisa, wahay imaden beledka, wahay
arken sidu shegey, wahay tayariyen pasaka.
17 Kolkey eheyd makhrib, wahu laimadey
laba iyo tobanki. 18 Ayakana kolkey ufa-
diyen hunguriga oyunayen, Yesu wahu yiri:
Amin wahan idinleyahay: Mid kino ya ibi-
hin dona, wa kan ilaunaya aniga. 19 Wahay
bilaben iney alolhumadan, oykudahan mid
midko: Ma aniga ? 20 Wa jawabey, wahu
kuyiri: Wa midkodha laba iyo tobanka
oigulakosaranayo fijanka dahdisa. 21 Wilki
Aden wa taga sidi lugudigey, ilowse wa ho-
gisa nin kas obihinayo Wilki Aden ! Waha
uroned inan ladalin nin kas.
22 Kolkey unayen, Yesu wahu ghadey
kibisti, wa udueyey, wa jebjebiyey osiyey,
wahu yiri: Ghata, kan wa kor keyga.
23 Wahu ghadey fijanka, wa shukri noghey,
wa usiyey. Way kaaben kuligodh kas.
24 Wahu kuyiri: Wa kan dig geygi oba-
lanka usuban ah oughubanaya kuwa badan
dara dodha. 25 Amin wahan idin leyahay:
Ma abayo marna mirahi sabibta tan iyo beri-
gan kuabi dono kuwa usuban suldanimadi
Ilahey dahdedha.
26 Kolkey hesen, way behen, oyukaen
burti Seytuni.
27 Yesuna wahu kuyiri: Wad inebaneysan
kuli gina haben kan, sababti waha lugu-
digey: Wan dilaya holaraa, idahana way
firdayan. 28 Ilowse sonolasha deyda kab-





adi wan idinhormaraya tan iyo Galilaya.
29 Petro wahu kuyiri: Hadey kuli godha
kunebadan, anigase maaha. 30 Yesu wahu
kuyiri: Amin wahan kuleyahay: Manta
awa dan intusan yerin digha laba gor, wad
iinkiri sedah gor. 31 Asagana wakadarey
inu kuhadlo: Hadey lasim igunoghoto inan
kuladinto ma kuinkirayi marna. Kuli godh-
na wahay kuhadlen sidas okale.
32 Wahay garen berto maga edha Getse-
mane layirahdo. Wahu kuyiri asahab tisa:
33 Farista inta, intan katukanayo. Wahu
watey Petro iyo Yaghub iyo Yohana, wahu
bilabey inu murgo obalanbalo. 34 Wahu
kuyiri: Naf teyda alolhuman badan bey
ghabta, tan iyo dimasha, inta fadiya oso-
jeda. 35 Kisto buhorey ukaey, dulka bu
kudaey, wa tukanayey, hadi lakarayo saa dan
ha mode asaga. 36 Wahu dehey: Abow,
kuli wad karta adiga igaduw fijan kan, ilowse
yeyan noghonin sidan rabo aniga, ilowse sidad
rabto adiga. 37 Wa uimadey, wahu arkey
ayako hurdan; wahu kuyiri Petro: Simon
ma huruda ? Sow ma leheyn hog ad kuso-
jedo saadona ? 38 Sojeda, tuga yeydnan
geline jirabka. 39 Nafta wa tayar, ilowse
korka wa nugulyahay. Wa iska tagey ha-
dana otukadey, wahu kuhadley hadalki hore.
40 Wa sonoghdey hadana, wahu arkey ayako
hurdan, sababti inda hodha way uslayen,
manaayan oghonin wahay ujawaben. 41 Wa-
hu imadey marki sedahad, wahu kuyiri:
Hurda hada onefsada. Wa deghi, saadi
way imatey. Firiya, Wilki Aden wa lobihini

gaa̲mahi kuwi dembi leh. 42 Kaa̲ an tagne,
kan ibih̲inayo wa soḋowadey.
43 Marku hadlayey, wah̲a imadey Yuda,
laba iyo tobanki mid kodha, asaga iyo ma-
khlugh badan kuwa sef leh iyo garuma,
wah̲ay kaimaden wadadahi waweyna iyo
kuwi fartayaghan iyo dugheyda. 44 Ki
bih̲inayey wah̲u siyey tilman, wah̲u ḋehey:
Kan ḋunkan dono way, ghabta, owata,
oḋowra. 45 Kolku garey marko wa utagey,
wah̲u yiri: Maa̲lin, Maa̲lin; ad bu uḋunkadey.
46 Wah̲ay utagen gaa̲ma hodha, way gha-
bten. 47 Kuwi lajogen midkodha wah̲u bih̲i-
yey sef tisa, wah̲u kuḋuftey adonki wadadki
weyna, wah̲u kagoyey ḋegto. 48 Yesu wa
jawabey, wah̲u kuyiri: Ma wah̲ad uimaten
sidi dad usoo̲dan ghaula, wah̲ad soghadatan
sef iyo garuma inad iwadan? 49 Beri
walba wan idinlajogey betmaghdeska ḋah̲-
disa onbarayey, imanaeydnan ghabanin, i-
lowse ḋigida halaḋameytiro. 50 Way ḋafen
kuli, way kaa̲raren.
51 Barbarko ba rae̲y, wah̲u guntadey
maradi kitani hakahuwade ghawananta;
52 way ghabten, asagana wah̲u ḋafey ma-
radi, wah̲u kua̲rarey ghawanan.
53 Wah̲ay uwaden Yesu wadadki weyna,
way usoaruren wadadahi waweyna iyo du-
gheyda iyo kuwi fartayaghan kuli. 54 Petro
wah̲u karae̲y mel fog tan iyo gosadi wadadka
weyn ḋah̲dedha, wah̲u lafaḋiyey adomada
okulalayen dabka. 55 Wadadahi waweyna
iyo barsada oḋan wah̲ay donen marag Yesu
korkisa, ha helane iney dilan, manaayan





helin. 56 Sababti kuwa badan ba kamarag-
kae̲n ben, marag godhana iskumid maahan.
57 Wah̲a jogsaden dad, wah̲ay kamarag-
kae̲n ben, wah̲ay ḋehen: 58 Anaka wan
kamaghalney asago leh: Aniga wah̲an jebin
dona betmaghdes kan, oluguḋisey gaa̲ma,
sedah̲ beri ban kuḋisi midkale onluguḋisin
gaa̲ma. 59 Sidasna marag godha iskumid
maehen.
60 Wah̲a jogsadey wadadki weyna ḋah̲-
dodha, wu warsadey Yesu, wah̲u ḋehey:
Sow ma jawabeysid kuwan wah̲ay kamarag
kaa̲yin? 61 Wu amusey mana jawabin.
Wadadki weyna wu uwarsadey hadana, wa-
hu kuyiri: Ma adiga Kristo ah, Wilki ki
lodue̲yey? 62 Yesu wah̲u yiri: Wa aniga,
idinkana wah̲ad arki dontan Wilki Aden
okufaḋiya midigti h̲oga onakuimanaya da-
rurahi i̲rka. 63 Wadadki weyna wah̲u jeh̲-
jeh̲ey marya hisa, wahu ḋehey: Mah̲an ka-
rabna marag hadana? 64 Wad maghashan
nijasada; mah̲ad aragtan? Kuli wah̲ay ku
h̲ukumen, wa lasim inu ḋinto. 65 Wah̲ay
bilaben ghar kodha iney kutufan andufa,
oydabolen fol kisa, oykuḋuften fer, oyku-
ḋahan: Sadi! Adomahi wah̲ay kuḋuften
ḋarbah̲a.
66 Petrona kolku jogey hos gosada ḋah̲-
dedha, wah̲a timid adomahi wadadki weyna
mid dodha, 67 wah̲ay aragtey Petro okula-
laya dabka, way firisey, wah̲ay tiri: Adigana
wah̲ad lajirtey Yesu ki Nasaret. 68 Wa
inkirey, wah̲u yiri: Ma aghan, mana magh-
layi wah̲ad ledahay. Wah̲u ubah̲ey bananka

irida agtedha. Digha wa yerey. 69 Ado-
ntina way aragtey hadana, wah̲ay bilawdey
iney ushegto kuwi jogen: Kan wa mid-
kodha. 70 Wu inkirey hadana. Kisto ka-
badi kuwi jogen, wah̲ay kudehen Petro:
H̲aghigha midkodha bad tahay, sababti wa-
h̲ad tahay rer Galilaya. 71 Wah̲u bilabey
inu ishabaro okudarto: Maaghan nin kan ad
shegeysin. Digha wa yerey marki labad.
72 Petro wah̲u h̲asustey hadalki ushegey
Yesu: Intusan yerin digha laba gor, wah̲ad
iinkireysa sedah̲ gor. Kolku fikrey, wa oyey.

## SURADA 15

1 Marko kolku waga beryey wadadahi
waweyna iyo dugheyda iyo kuwi fartayaghan
iyo barsado dan, way shauren, wah̲ay h̲iren
Yesu, way waden oyubih̲iyen Pilato. 2 Pi-
lato wa uwarsadey: Ma adiga ah suldanki
Yahud ? Asagana wa jawabey, wah̲u kude-
hey: Adiga tiri. 3 Wadadahi waweyna wah̲
badan bey kuashtakeyen, asagana ma jawa-
bin. 4 Pilato wa warsadey hadana: Sow
hadal ma jawabeysid ? Firi sidey ad kugu-
ashtakeynayin. 5 Ilowse Yesu ma jawabin
hadal kasta, tan iyo wa staa̲jabey Pilato.
6 Wakhtigi ida wah̲u ufura mah̲busko
mid kasta oy dorten. 7 Wah̲a jirey ninko
maga i̲sa Barabba layirahdo olalah̲irey kuwi
fidma lasubiyen, ofidmada dah̲dedh̲ana kusu-
biyen dilid. 8 Makhlugha way ghayliyen
oybilaben iney tugan, ha usubiyo sidi da-
sturtu subin jirey. 9 Pilato wa ujawabey,





wah̲u yiri: Ma rabtan inan idinfuro suldanki
Yahud ? 10 Sababti wu gartey wadadahi
waweyna iney usobih̲iyen h̲asidnima.
11 Wadadahi waweyna wah̲ay kughalgha-
liyen makhlugha, iney uron tahay in lofuro
Barabba. 12 Pilato wa jawabey mar kale,
wah̲u kuyiri: Mah̲ad rabtan hade inan
kusubiyo kan, ad kushegeysan suldanki Ya-
hud ? 13 Wah̲ay kughayliyen hadana: Sta-
labta kughodob ! 14 Pilato wah̲u kuyiri:
H̲uman sidee busubiyey hade ? Ad bey
ogadaren iney kughayliyan: Stalabta ku-
ghodob ! 15 Pilatona wah̲u je̲ladey inu
subiyo wah̲u rali kuyahay makhlugha, wah̲u
ufurey Barabba, wah̲u ubih̲iyey Yesu, kolku
garae̲y, ha lughodbe stalabta.
16 Askartina wah̲ay uwaden Yesu gosada
dah̲dedha meshi h̲ukunka, wah̲ay isuguyeren
askarti odan. 17 Wah̲ay ugarba saren mara
gadudan, wah̲ay salogen dub ghodah̲ ah, wa-
h̲ay ugeliyen madah̲a; 18 wah̲ay bilaben iney
salaman: Nabad suldanki Yahud ! 19 Wa-
h̲ay kagaduften madah̲a ghaysaran oykutu-
fen a̲nduf; way ujilbajogsaden, oyusujuden.
20 Kolkey kudelen, wah̲ay kafuren maradi
gadudneyd oyuguntiyen marya hisa, wah̲ay
uwaden bananka stalabta ha kughodbane.
21 Wah̲ay kulasimiyen ninko agmarayey,
Simon Kurene, wah̲u kaimadey badiya,
abahi Iskander iyo Rufo, ha ughade stalab
tisa. 22 Wah̲ay uwaden mel loguyero Gol-
gotha, ma̲na hedha, meshi madah̲a. 23 Wa-
h̲ay siyen khamra lugudarey malmal, ha
warabe, asagana ma ghadanin. 24 Kolkey

kughodben stalabta, wahay gheybsaden ma-
rya hisa, way kughoritamen mid walba wahu
helayo. 25 Wahay eheyd saadi sedahad,
stalabtey kughodben. 26 Alwanki ashtaka
disa waha lugudigey kor: "Suldanki Ya-
hud." 27 Asagana waha lugulaghodbey
stalabta laba ghaule, midko midigta iyo
midna bidah disa. 28 Wa dameytirantey
digidi tirahdo: Waha lugutiriyey asiyalka.
29 Kuwi marayen way ayen, wahay lululen
madahya dodha oydehen: Ah! adiga jebi-
neysa betmaghdeska okudiseysa sedah beri.
30 Isfaki naftadha okasodeg stalabta.
31 Sidas okale wadadahi waweynana way
kudehen dahdodha ayaka iyo kuwi fartaya-
ghan, wahay dehen: Wahu fakiyey kuwa
kale, asaga naftisa isma fakin karo.
32 Kristo, suldanki Israel ha kasodego hada
stalabta, an aragne, on amine. Iyo kuwi
stalabta lugulaghodbeyna way ayen.
33 Kolkey gartey saadi lehad, wahay
noghotey mugdi dalka odan tan iyo saada
sagalad. Saadi sagaladna ad buughayliyey:
34 Eloi Eloi lama sabakthani? Mana he-
dha, Ilahayow, Ilahayow, mahad idaftey.
35 Kuwi jogen gharkodha omaghlayen, wa-
hay dehen: Wahu uyeraya Eliya. 36 Ninko
ba ordey, wahu kushubey barkima waraba
khal, wahu sarey dun aus ah, wa uwarabiyey,
wahu yiri: Dafa, an aragne, hadu Eliya
uimanayo inu kasodejinayo. 37 Yesu ad bu
ughayliyey, nafta bu bihiyey. 38 Hijabki
betmaghdeskana laba mel bu ukaladilaey
tan iyo kor iyo hos. 39 Sef jidki tagna mel





kutosan, wahu arkey inu sas ughayliyey
osbihiyey nafta, wahu yiri: Haghigha nin
kan wahu aha Wilki Ilahey. 40 Wahana
jogen naga mel fog kafirinayen, naga has
dahdodha waha kujirtey Maryan Magdalene
iyo Maryan habarti Yaghub kiyara iyo
Yose, iyo Salome; 41 wa kuwi raen, kolku
jogey Galilaya ouadegi jiren, iyo kuwakale
obadan, olafulen tan iyo Yerusalem.
42 Kolkey noghotey asar, sababti wa
berigi lawanajinayey, mana hedha berigi
kahorey sabato, 43 waha imadey Yusuf rer
Arimathia, ninki barsada ohishmad leh,
wahu aha nin firsanayey suldanimadi Ilahey,
wahu ugugaley Pilato gesinima, wahu katugey
korki Yesu. 44 Pilato wahu kuyabey inu
dintey, wahu uyerey sef jidki, wahu warsa-
dey inu madowa dintey. 45 Kolku kaheley
khabar sefjidka, wahu siyey Yusuf medki
Yesu. 46 Wahu gadey kafan, osdejiyey,
wahu kuhirey kafanti wahu geliyey ghaburto
kaghodneyd ghar, wahu kugarangeriyey da-
gah iridi ghaburta. 47 Maryan Magdalene
iyo Maryan habarti Yose wahay firiyen meshi
lageliyey.

## SURADA 16

1 Kolkey sabatoda damatey, Maryan Mag-
dalene iyo Maryan habarti Yaghub iyo Salo-
me, wahay gaden dir udgon, iney ukaan ha
mariyane asaga. 2 Waberigi berigi uhore-
yey jumada, wahay garen ghaburti saladi,
kolkey ghorahda sobaheysey. 3 Wahay
iskulahadlayen: Ya nogagarangerin dona

dagaha ghaburta irid dedha. 4 Kolkey firi-
yen, wahay arken dagahi in lagagarangeri-
yey, sababti ad buuweyna. 5 Ayakana
kolkey galen ghaburta, wahay arken nin
dalin yar ofadiyey barbarki midigta, ogunta-
na mara ad, way nehen. 6 Asagana wahu
kuyiri: Ha nehina; wahad doneysan Yesu ki
Nasaret olugughodbey stalabta, wa noladey,
ma jogo inta, firiya meshey digen. 7 Ilowse
kaa, ushega asahab tisa iyo Petro inu idin-
hormarayo Galilaya, hagas wad kuarkeysan,
sidu idinyiri. 8 Daghsey ubahen oykaara-
ren, way nehen, nina umaayan shegin hadal,
sababti way absaden.

9 Kolku sonoladey Yesu subahdi berigi
uhoreyey jumada, wahu usobahey horta
Maryan Magdalene, ti ukabihiyey todoba
jini. 10 Eyada way tagtey, oyushegtey
warka kuwi lajogi jiren obaroranayen
ooynayen. 11 Ayakana kolkey maghlen inu
nol yahay, onayaragtey, maayan aminin.
12 Wah han kabadi wahu ugusobahey
midab kale laba dodho intey sooden oyujeden
badiya. 13 Iyo kuwana way ukaen oy-
ushegen warka kuwi kale, ilowse kuwas ma-
naayan aminin ayaka.
14 Kabadi wahu usobahey kow iyo to-
banki, kolkey ufadiyen hunguriga, wahu
anantey ayaka iman laan todha iyo ghalbi
adkan todha, sababti maayan aminin kuwi
arken, kolku sonoladey. 15 Wahu kudehey:
Ukaa duniyeda odan uwadiya anjil unka
oidil. 16 Kiamina onalabatiso wa faka-





naya, kanse aminin wa lahukumaya. 17 Ku-
wi aminana waha raayan inshara han: Wa-
hay kubihinayan maga eyga jiniyada, wahay
kuhadlayan araba usuban, 18 wahay gha-
dayan halaghya; hadey waraban wahi dad
dila ma haleynayo, wahay sarayan kuwa
jiran gaamaha, ayakana way bogsanayan.
19 Sa Siydi gortu lahadley ayaka, kor ba
loghadey tan iyo irka, osfadiya midigti Ila-
hey. 20 Ilowse ayaka way bahen oyku-
wadiyen mel walba, Rabina wa lakalmeyey,
oskuadkeyey hadalki insharaha lajiren.
Amin.